Fahmidda TAA: Warbixin Kooban



Oggolaanshaha Hore iyo Kharashka la isu Celiyo

Oggolaanshaha hore ayaa shuruud u ah kharashka la isu celiyo. Haddii aad u maleyneyso in aad u baahan tahay in laguu soo celiyo kharash lagaa rabo, waa in aad la xiriirto Trade Adjustment Assistance (Caawimaadda Xirfad Barashada ama TAA).

- ✓ Si aad u hesho oggolaanshaha hore ee kharashka ay soo celiso TAA, waxaad u baahan tahay in aad isku diiwaan geliso aqoonsi ah SWIFT Supplier ID. Fadlan iska diiwaangeli halkan: http://mn.gov/supplier

Buugaag waxbarasho, Qalab, Dhar Gaar ah, iyo alaabo ah Kambuyuutar/Qalabka Technoolajiga

- ✓ TAA waxay bixisaa **marka la iska rabo** buugaagta, qalabka, dharka gaarka ah, iyo alaabo ah kambuyuutar ama qalabka technoolajiga.
- ✓ Waa inaad TAA ula soo xiriirto oggolaanshaha hore KA-HOR intaadan iibsan wax aan ahayn buugaag

Intarnet

- ✓ TAA waxay soo celineysaa $25.00 oo ah kharashka intarnetka markaad qaadaneyso ugu yaraan hal galaas oo ah intarnetka.

Caawimaadda Dheeraadka

- ✓ **Gaadiid:** TAA waxay kugu caawineysaa inta meyl ee aad gaari ku socdaashay ee ka baxsan goob aad shaqo u aaddo oo ah ilaa 15 meyl sii-socod ama soo-socod. Inta meyl ee la isku soo celinayo waxa ay ka bilaabanayaan meylka 15aad.
- ✓ **Helidda Quutal-daruuriga:** Haddii aad rabto in aad haysato meel labaad oo aad ku noolaato ama kuu ah meelgaar ka fog gurigaaga oo aad si shakhsi ah uga qeybgaleyso tababar, waxaad xaq u yeelan kartaa helidda quutal-daruuriga.

Waraaqaha Muhiimka ah ee la soo Gudbinayo

- ✓ **Training Progress Reports (Warbixinta Halkuu Marayo Tababarka ama TPRs)**: **oo lagaa rabo 60kii maalmoodba hal mar** laga bilaabo tababarka TAA ilaa uu tababarku kuu dhammaado, xataa haddii fasax laga aado tababarka.
- ✓ **Jadwalka Galaasyada:** TAA u soo gudbi inta aadan bilaabin xilli waxbarasho oo cusub
- ✓ **Buundooyinka:** TAA u soo dir ka dib marka uu xilli waxbarasho kuu dhammaado
- ✓ **Shahaadada:** TAA u soo gudbi koobbiga shahaadada marka tababarku kuu dhammaado

Waxa Lagaa Filanayo

- ✓ **Inta aad barnaamijka ku jirto:** waxaa khasab ah (1) in aad la soo xiriirto La-taliyaha barnaamijka Dislocated Worker (Dadka Waayey Shaqadoodii Muddada Dheer ama DW) 30kii maalmoodba hal mar (2) in aad sameyso shaqa-raadis iyo qorista goobaha raadinta shaqada (3) in aad warbixin soo gudbiso 30kii maalmoodba hal mar markaad isku qoreyso tababar.
- ✓ **Sharciga Hal-mar Buundada Xun:** waa in aad galaasyadaada oo dhan ku gaarto buundo ah ugu yaraan "C" ama ka sarreeya oo waa in aadan ka harin galaas ay kharashkiisa masuul ka tahay TAA.
- ✓ **Waxbaris:** Haddii aad dhib ku qabto casharrada, TAA ayaa kaa bixin karta qof wax ku bara
- ✓ **Wax-beddelid:** Xaaladaha qaarkood, TAA ayaa oggolaan karta in wax laga beddelo qorshe tababar oo kol hore la oggolaaday sida beddelka nooca waxbarashada, heerka shahaadada kuleejka, taariikhda dhammaadka tababarka ama xaalad ah ardeynimo buuxda/aan buuxin. Codsiyada wax lagu beddelayo oo dhan waxaa shuruud ah in aad adiga iyo La-taliyehaaga DW la xiriirtaan TAA si loo soo oggolaado KA-HOR inta uusan isbeddelku dhicin.

Trade Readjustment Allowance (Lacagta La-qabsiga Shaqada ama TRA)

- ▶ Waa in aad tahay arday ku jira waxbarasho buuxda (sida ay qeexayaan iskuulka) si aad u hesho TRA, oo waxaa ku jira xilliga kuleylaha.
- ▶ TRA waxa ay dhammaaneysaa maalinta kuugu dambeysa tababarka ama taariikh ka horreysa haddii ay kaa dhammaato usbuucyada TRA laguu hayo.
- ▶ TRA kala xiriir DEED.TRA@state.mn.us wixii su'aalo ku saabsan koontadaada UI/TRA.